OFFICE OF ARTS & CULTURE
CITY OF SEATTLE

# Tilmaamaha Sanduuqa Xarumaha Dhaqanka ee 2025

## Dulmarka Deeqaha

Sanduuqa Dhaqanku wuxuu ka taageeraa hay'adaha fanka, dhaqanka, iyo hidaha ee Seattle mashaariicda xaruntooda. Hadafkayagu waa inaan u abuurno marin ka wanaagsan dadka sida xaq-darrada ah looga saaray lahaanshaha, maamulka, ama kireynta hantida.

**Macluumaadka iyo caawimada arjiga, u-qalmitaanka, ama taageerada farsamada ee onlaynka ah,** kala xidhiidh Maamulaha Mashruuca Maalgelinta Xarumaha Dhaqanka CulturalFacilitiesFund@seattle.gov ama Ashraf Hasham, Iskaashiga, Waxbarashada, iyo Maareeyaha Deeqaha 206-514-1057.

**Waxaan leenahay turjubaano kugula hadli kara luqadaada, oo ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha Ameerika (muuqaal ahaan).** Kaliya na soo wac oo noo sheeg luqadda aad ku hadasho. Filo hakad gaaban inta aan heleyno turjumaan si uu ugu so biiro wicitaanka.

## Codsiga

Ka codso onlayn: https://seattle.fluxx.io/user_sessions/new

Ururada xiisaynaya inay codsadaan labada Sanduuqa Xarumaha Dhaqanka iyo barnaamijka Xarunta Farshaxanka & Sinnaanta Jinsiyadaha, labadan deeqood waxay wadaagaan arji isku mid ah oo onlayn ah.

Haddii aadan lahayn kombuyuutar ama internet, nala soo socodsii waxaan kala shaqayn doonnaa sidii aad u heli lahayd qaabab kale oo shaqayn kara.

## Taariikhda la filayo

**Talaado, Ogosto 5, 2025, 5 galabnimo. Pacific**

Fadlan u ogolow wakhti ku filan oo aad ku buuxiso codsigaga. Codsiyada la soo gudbiyay ka dib 5 pm (Pacific) waqtiga kama dambaysta ah lama aqbali doono.

## U-qalmitaanka

- Waa inaad noqotaa mid ka hawlgala Seattle ku salaysan fanka, dhaqanka, hidaha, ama ururka adeegga fanka.
    - Waxaad noqon karta sida urur aan faa'iido doon ahayn ama ay maaliyad ahaan ay kafaalo qaado hay'ad aan faa'iido doon ahayn.

    - Waxaad noqon karta urur faa'iido doon ah, laakiin dakhligaaga guud ee sanadlaha ah ee sanad xisaabeedka ugu dambeeyay ee la dhameeyay wa inuusan dhaafin $5,000,000.
- Waa inaad ka wakiil u noqoto bulshooyinka sida xad-dhaafka ah ay u saamaysay takoor-dhismeedka iyo cadaadisku (dulmi) , isla markaana/ama aad caddeysaan ballan-qaad ah in ururkiinnu ku dhisan yahay ka-hortagga cunsuriyadda adiga oo wax walba u eegaya aragtida is-goysyada leh (intersectional lens).
- Waa inaad haysataa ugu yaraan saddex sano oo ah taarikh aad u lahayd waxtar dadweynaha ama deganeyaasha Seattle.
- Waa inaad muujisaa inaad leedahay diiwaan guulo faneed ama dhaqameed ah oo so jireen ah magaalada Seattle.
- Waa inaad haysataa nambarka Aqoonsiga Canshuurta Federaalka, Shatiga Ganacsiga Magaalada Seattle, oo fadhigaagu yahay magaalada Seattle.

Kontaroolka goobta:
- Kharashyada "Raasamalka ka hor", sida daraasadaha suurtagalka ah, adeegyada dhismaha ama injineernimada, loogama baahna kontoroolka goobta.
- Si loo hagaajiyo xarunta, dib u cusboonaysiinta, iyo mashaariicda kale ee raasumaalka ah, waa in aad hesho xarunta lahaanshaha ama heshiis (ugu yaraan shan sano oo ah kantaroolka goobta, taas oo noqon karta isku darka sanado ka harsan heshiis kiro iyo ikhtiyaar hal dhinac ah oo lagu kordhinayo).

## Maalgelinta
Waxaad codsan kartaa **ilaa $50,000** si aad ugu bixiso kharashyada mashruuca tooska ah. Abaalmarintu waxay noqon kartaa in ka yar inta la codsaday. **Waxaad soo gudbin kartaa mid ka mid ah labada heer ee maalgelinta.**

Heerka Koowaad, codsiyada ilaa $25,000 ah waa la tixgelin doonaa. Heerka Labaad, codsiyada ka badan $25,000 ilaa $50,000 waa la tixgelin doonaa. Codsadayaasha Tier Two waxay u baahan doonaan inay caddeeyaan in ugu yaraan 50% wadarta guud ee miisaaniyadooda mashruuca la xaqiijiyay ka hor intaanay codsan Sanduuqa Xarumaha Dhaqanka.

## Aqoon isweydaarsiyada macluumaadka
Iska diiwan geli aqoon-is-weydaarsi fogaan ah si aad wax badan uga ogaato deeqdan iyo sida loo gudbiyo codsigaaga ugu fiican. Saacadda ugu horreysa ee aqoon-is-weydaarsi kasta waxa ay diiradda saari doontaa codsashada deeqdayada Farshaxanka Xarunta & Sinnaanta Jinsiyada. Haddii aad xiisaynayso inaad sidoo kale wax ka ogaato deeqdan Sanduuqa Adeegyada Dhaqanka, waa inaad qorshaysaa inaad joogto 90 daqiiqo oo buuxa.

**Aqoon isweydaarsi 1**
Khamiis, Meey 29, 2025 laga bilaabo 10:30 subaxnimo - 12:00 galabnimo. Pacific
Ku so jawaab ilaa 5/29

**Aqoon isweydaarsi 2 ASL-la tarjumay**
Isniin, Juun 2, 2025 2:30 - 4:00 galabnimo. Pacific
Ku jawaab ilaa 6/2

**Aqoon isweydaarsi 3**
Talaado, Juun 24, 2025, 12:00 galabnimo - 1:30 galabnimo. Pacific
Ku jawaab ilaa 6/24

**Aqoon isweydaarsi 4**
Arbaco, Luulyo 9, 2025, 1:00 - 2:30 galabnimo. Pacific
Ku jawaab ilaa 7/9